

3Labo jibbaarka VT (3SquaresVT)

*Barnaamijka Kaalmada Nafaqada Dheeraadka ah ee Vermont
(ee horay loogu aqoon jiray Kaarka Cuntada (Food Stamps))*

***Dad badan oo Reer Vermont ah ayaa Hadda u
Qalma ***

**Xadadka dakhligu waa kordheen!
Waxa aad kaydsatay dib danbe wax kaaga
horjoogsan maayaan!**

- Dad badan oo reer Vermont ah oo dakhligoodu sarreeyo ayaa hadda faa'iidooyin heli kara. Qoysaska ka kooban 4 qof ee kasbada ilaa iyo \$3,269/bishiiba ayaa laga yaabaa in ay weli u sii qalmi karaan faa'iidooyinka.
- Ma jirto xad loo goynayo oo ay leedahay lacagta kaydka bangiga kuugu jirta si aad ugu qalantid faa'iidadada (qoysaska intooda badan). Waxaa lagugu dhiirri gelinayaa in aad wax u kaydsatid waxyaabaha aad u baahan tahay si aad u sii heshid caawino dheeraad ah.

Wixii macluumaad dheeraad ah iyo codsigaba
Wac: **Adeegyada Dhaqaalaha 1-800-287-0589**
Booqo: **www.vermontfoodhelp.com**

Xusuusnow:

- Faa'iidooyinka 3SquaresVT wuxuu carruurtaada ka dhigayaan kuwo u qalma cunto iskuulka laga siiyo oo lacag la'aan ah, lacag bishiiba kayd u gasha oo dhan ilaa iyo \$85 canuggiiba.
- Qoysaska dadkooda ay ku jiraan qof da'diisu tahay 60+ iyo ka weyn ama qof naafinnimo qaba ma laha xad dakhli, laakiin waa inay yeeshaan xad ilo dhaqaale xaaladaha qaarkood.
- Haddii aad qaadatid Kaydka Canshuurta Dakhliga la Kasbaday ee Vermont (Vermont Earned Income Tax Credit), SSI (Dakhliga Nabad suigdda Dheeraadka ah ama Lacagta Dadka Waayeelka ah (Supplemental Security Income)), ama Reach Up waxaa laga yaabaa in aad u qalantid faa'iidooyinka iyadoo aan loo eegaynin waxa uu dakhligaagu ama ilahaaga dhaqaaluhu yihiin.

Si aad u heshid caawino dheeraad ah wac **2-1-1** si aad ula xiriirto **Hay'adda Waxqabadka Bulshada** ee kuugu dhow.

Haddii aad tahay qof da` ah, wac **1-800-642-5119** kaas oo ah **Khadka Caawinta Dadka Da`da ah ee Vermont.**



Vermont Campaign to
End Childhood Hunger

*Fartiintaan waxaa qayb ahaan maalgeliyey USDA, adeeg
bixiye iyo shaqaaleeye fursaddiisa loo siman yahay.*

4/14/09

